

# Dadka nugul oo tallaalka hargabka oo lacag la'aan ah ka helaya degmooyinka

Dawladda ayaa hadda suurtagelinaysa in dadka nuguli ay tallaalka hargabka oo lacag la'aan ah ka helaan degmooyinka. Waxa kale oo dadkan tallaali kara dhakhtarkooda haddii ay iska bixiyaan 50 karoon. Dadka haysta kaadhka lacag la'aanta (*frikort*) tallaalkoodu waa lacag la'aan xataa haddii dhakhtarkoodu tallaalo.

– Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) ayaa ka digay in hargabka iyo fayruska RS ay sannadkan noqon karaan kuwo xoog weyn, iyadoo covid-19 na uu weli socdo. Taas darteed waxa muhiim loo arkaa in qayb weyn oo ka mid ah dadka nugul laga tallaalo hargabka ka hor intaan la gaadhin xilliga hargabku yimaado. Markaa waxan dadka nugul, oo carruurta ku jirto, ku boorinayaa in ay qaataan tallaalka hargabka, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Carruurta ka tirsan dadka nugul ayaa u sii dhow in cisbitaal la dhigo hargabka dartii.

– Sannadihii hore wax ka yar boqolkiiba 20 carruurta ka tirsan dadka nugul ayaa qaatay tallaalka. Waa in aynu ka shaqayno in dadku ogaado fursadaha tallaalka ee loo fidiyay. Waxa kale oo sannadkan cusub in la soo jeedinayo in xataa carruurta wakhtigeeda ka hor dhalatay loo fidiyo tallaalka ilaa marka ay noqonayaan shan sanno jir, ayuu yidhi Høie.

Wixii ka horreeyay 2020 waxa dadka nuguli ku qasbanaayeen in ay tallaalka hargabka ka bixiyaan 175 ilaa 575 karoon, iyadoo ay mar kasta ku xidhnayd qiimaha tallaalista ee goobta tallaalka. Sannadkii 2020 ayay dawladdu oggolaatay in dadka nugul ay tallaalka hargabka ka qaadan karaan dhakhtarkooda iyagoo iska bixinaya 50 karoon, ama si lacag la'aan ah haddii ay haystaan kaadhka lacag la'aanta.

– Sannadkan waa la sii balaadhinayaa fursadahan. Degmooyinka ayaa dadka nugul u fidinaya tallaalka lacag la'aan ah. Islamarkaana dadka nuguli weli waxay tallaalka ka qaadan karaan dhakhtarkooda haddii ay iska bixiyaan 50 karoon. Dadka haysta kaadhka lacag la'aanta, waa u bilaash, ayuu yidhi Høie.

Marka loo gudbo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh" waa in degmooyinku weli heegan ahaadaan oo awood badan u qoondeeyaan tallaalista koroonaha, taas oo faa'ido u noqonaysa tallaalista ku saabsan hargabka.

Tallaalka ku jira barnaamijka tallaalka hargabku waxa uu diyaar noqonayaa bisha Oktoobar gudaheeda. Xilliga hargabka ee 2021/2022 waxa Machadka Caafimaadka Dadweynuhu ku guulaysatay in uu u soo helo 1,84 milyan irbadood oo loogu talagalay dadka nugul iyo shaqaalaha caafimaadka, iyadoo 241 000 irbadood loo qoondeeyay shaqaalaha caafimaadka. Tirooyinkan waxa ku jira 40 000 irbadood oo ah tallaalka la sii xoojiyay oo loogu talagalay dadka gaboobay iyo dadka sii nugul. Waa tiro aad uga badan intii 2020-kii oo la dalbaday 1,2 milyan oo irbadood. Dalabka sannadkani wuxu suurtagelinayaa in la tallaalo boqolkiiba 100 dadka tallaalka loogu talagalay iyo boqolkiiba 75 shaqaalaha caafimaadka.

– Waxannu filaynaa in deyrta aad diiradda loo saari doono tallaalka, markaa waxannu rajaynaynaa in dhakhaatiirtu ay dadka nugul ku dhiirigeliyaan qaadashada tallaalka marka ay ugu yimaadaan xafiiskooda, ayuu yidhi Bent Høie.

Shaqaalaha caafimaadka ee u dhawaanaya ama taabanaya bukaanka iyo shaqaalaha ilaaliya doofaarka iyo dadka kale ee u dhawaada doofaar nool waxa loo fidinayaa tallaalka lacag la'aan ah, laakiin waa in shaqo-bixiyuhu uu weli bixiyo lacagta ku baxaysa tallaalista.

Dhakhaatiirta joogtada ah waxa la siinayaa gunno markay cid tallaalaan. Marka uu jiro shaqaale halis ugu jira in ay cudurka qaadaan iyagoo shaqada ku jira, waa in shaqo-bixiyuhu ka hawlgalo sidii shaqaalahaasi u heli lahaa macluumaad ku saabsan tallaalka hargabka isla markaana looga bixin lahaa lacagta tallaallista. Bixinta lacagta tallaallista shaqaalaha caafimaadka waxa lagu salaynayaa nidaamkii hore.

Tirooyinka laga helay Hay'adda Tiraboobka ee Norway (SSB) ee khuseeya 2020/2021 ayaa muujinaya in sannadkii hore boqolkiiba 48 la tallaalay dadka ka weyn 65 sanno jir. Waxa qaybta ugu badan la tallaalay dadka gaboobay ee cudurro kale qabay, waxaana qaybta ugu yar la tallaalay dhallinyarada qabtay xaaladdo caafimaad oo halista kor u qaada.

**Dadkan hoos ku qoran ayaa ka mid ah kuwa loo yaqaanno dadka nugul ee lagula talinayo in ay qaataan tallaalka hargabka maadaama ay u sii nugul yihiin in ay aad u**

**xanuunsadaan (faahfaahin dhammaystiran ka eeg barta Machadka Caafimaadka Dadweynaha):**

- Dhammaan dadka ka weyn 65 sanno
- Dadka deggan guryaha bukaanka iyo guryaha daryeelka
- Carruurta iyo dadka waaweyn ee qaba xanuunnada wadnaha iyo sambabada, macaanka (sonkorowga), hoos u dhac ku yimi awoodda beerka ama kelyaha, cudur neerfeyaasha la xidhiidha, hoos u dhac ku yimi difaaca jidhka (iyo ehelkooda) iyo cayilka gaadhay heer xad-dhaaf khatar ah
- Haweenka uurka leh ee maraya toddobaadka 13-aad ilaa iyo dhammaadka toddobaadka 42-aad (tirimesterka 2-aad iyo ka 3-aad), iyo haweenka uurka leh ee ku jira 12-ka toddobaad ee uurka u horreeya ee qaba cudur muddo soo jiidamay, ama shaqaale caafimaad ah